HEALTHeLINK

Oggolaanshaha Bukaanka ee looga Qayb qaadanayo Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka HEALTHeLINK

Heerka 1 Daryeel Bixiyaha-Badan/Oggolaanshaha Bixiyaha-Badan

Fadlan u akhri si taxadar leh macluumaadka soo socda kahor inta aadan gaarin go'aankaaga.

Waxaad isticmaali kartaa Foomkan Oggolaanshaha si aad u go'aansato haddii aad oggolaanayso ama aadan oggolaanayn Kaqayb qaadashada Daryeel Bixiyaasha HEALTHeLINK iyo Bixiyayaasha ("Kaqayb qaatayaasha") kuwaas oo ku lug leh daryeelkaaga si ay u arkaan ama u helaan diiwaanadaada caafimaadka elektarooniga ah ee loogu talogalay ujeeddooyin daaweyn iyo/ama maarayn daryeel. Foomkan waxaa la buuxin karaa hadda ama taariikh kale oo dib dambe ah. Waxaad siin kartaa ama u diidi kartaa oggolaanshahaaga qaar kamid ah ama dhammaan Kaqayb qaatayaasha. Liis buuxa oo kusaabsan Kaqayb qaatayaasha ayaa laga heli karaa boggaan internetka ah www.wnyhealthelink.com/Home/Patients/Participants. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo kusaabsan buuxinta foomkan waxaad gashaa boggaan internetka ah www.wnyhealthelink.com/Home/Patients/PatientConsent. Haddii aadan haysan internet oodna jeceshahay liiska Kaqayb qaatayaasha ama u baahantahay caawimaad laguugu caawiyo buuxinta foomkan, fadlan wac lambarkan (716)206-0993 wicitaanka fog 311. **Doorashadaadu ma ahaan doonto mid saamaysa awoodaada ah in aad ku heshid daryeel caafimaad ama caymis kujirid caafimaad. Doorashadaada ah in aad bixisid ama diidid oggolaansho uma ahaan doonto mid kusalaysan diidista adeegaha caafimaadka.**

Gudaha Foomkan Oggolaanshaha, waxaad ka dooran kartaa haddii aad u oggolaanaysid Kaqayb qaatayaasha in ay ka helaan diiwaanadaada caafimaadka tooska shabakad kombuyuutar laga maamulo dhinaca HEALTHeLINK, midkaas oo ah qayb kamid ah shabakad kombuyuutar waddanka oo dhan ah. Midaan waxay dad ku caawinaysaa in la aruuriyo diiwaanada caafimaadka aad ku leedahay meelo kala duwan halkaas oo aad ka heshid daryeel caafimaad, oona looga dhigo kuwo ay u helaan qaab elektaroonig ah Kaqayb qaatayaasha adiga ku siinaya adeegaha.

DOOROKALIYAHAL

☐ **HAA**

WAXAAN OGGOLAANSHO SIINAYAA dhammaan Kaqayb qaatayaasha ku lug leh daryeelkayga in ay ka helaan DHAMMAAN macluumaadkayga caafimaadka elektarooniga ah tooska HEALTHeLINK. Adiga oo doorta khaanadan waxay macnaheedu tahay in aad oggashahay, "Haa, shaqaalaha ku lug leh daryeelkayga uu kujiro daryeelka xaaladaha degdega ah, wanaajinta tayada, daryeelka maaraynta, iyo hawlaha oggolaanshaha-hore ee dhammaan Kaqayb qaatayaasha way ka arki karaan wayna ka heli karaan dhammaan diiwaanadayda caafimaad tooska HEALTHeLINK."

☐ **HAA**

☐ **AAN KA AHAYN**

WAXAAN OGGOLAANSHO SIINAYAA dhammaan Kaqayb qaatayaasha ku lug leh daryeelkayga in ay ka helaan DHAMMAAN macluumaadkayga caafimaadka elektarooniga ah tooska HEALTHeLINK aan ka ahayn Kaqayb qaatayaashan soo socda:

Magaca Kaqayb qaataha **Lambarka teleefoonka ama cinwaanka Kaqayb qaataha**

Kaqayb qaatayaashan kama geli karaan macluumaadkayga caafimaadka elektarooniga ah tooska HEALTHeLINK *AAN KA AHAYN caafimaadka xaalada degdega ah.*. Haddii aad dooratay in aad ka bixiso ama kasaarto mid kasta oo kamid ah Kaqayb qaatayaasha, waxaa **khasab** kugu ah in aad kala xiriirtid HEALTHeLINK lambarkan (716)206-0993 wicitaanka fog 311 si aad u xaqiijiso foomkaagato. Haddii aad jeceshahay in aad diidid oggolaanshaha lasiiyo Kaqayb qaatayaasha dheeriga ah, fadlan ka aqoonso Foomka Kaqayb qaataha Lasaaray ama la fogeeyay kadibna kusoo lifaaq foomkan. Waxaad ka heli kartaa foomka boggaan internetka ah www.wnyhealthelink.com/Home/Patients/PatientConsent. Haddii aad soo lifaaqday Foomka Kaqayb qaataha Lasaaray ama la fogeeyay fadlan dooro hal kan.

☐ **MAYA**

WAXAAN U DIIDAYAA IN AAN OGGOLAANSHO SIIYO dhammaan Kaqayb qaatayaasha ku lug leh daryeelkayga in ay ka helaan macluumaadkayga caafimaadka elektarooniga ah tooska HEALTHeLINK ujeeddo kasta oo loogu talogalay, AAN KA AHAYN *caafimaadka xaalada degdega ah*. Adiga oo doorta khaanadan waxay macnaheedu tahay in aad oggashahay, "Maya,midna Kaqayb qaatayaashu in aanan la siinin in ay ka helaan diiwaanadayda caafimaadka tooska HEALTHeLINK aan ka ahayn haddii ay tahay caafimaadka xaalada degdega ah."

☐ **AAN KA AHAYN**

WAXAAN U DIIDAYAA IN AAN OGGOLAANSHO SIIYO dhammaan Kaqayb qaatayaasha ku lug leh daryeelkayga in ay ka helaan macluumaadkayga caafimaadka elektarooniga ah tooska HEALTHeLINK ujeeddo kasta oo loogu talogalay, AY KUJIRAAN *caafimaadka xaalada degdega ah*.

☐ **MAYA MARNA**

FIIRO GAAR AH: Aan ka ahayn haddii aad dooratay "MAYA MARNA" sharciga Gobolka New York wuxuu u oggolaanayaa dadka kugu daawaynaya caafimaadka xaalada degdega ah in ay helaan diiwaanadaada caafimaadka, ay kujiraan diiwaanada laga helo tooska HEALTHeLINK.

BUKAANKA/WAKIILKA SHARCIGA AH

Magaca Dambe ee Bukaanka:

Magaca Koowaad ee Bukaanka:

/ / ☐ **Lab** ☐ **Dhedig**

Taariikhda Dhallashada Bukaanka:

Cinwaanka Bukaanka

Magaalada **Gobolka** **FURAHA XAAFADA**

Sixiixa Wakiilka Sharciga ah ama Bukaanka **Taariikhda**

Qor Magaca Wakiilka Sharciga ah ee Bukaanka

Xariirka uu la leeyahay Wakiilka Sharciga ah Bukaanka (haddii la helayo)

☐ waalid ☐ wakiil daryeel caafimaad/wakiil ☐ mas'uul ☐ waxkale _____

_____
Oggolaanshaha Hay'ada Waxaa Laga Helay Dhinaca

MARKHAATI *

* Haddii AADAN ku buuxinaynin foomkan xafiiska Kaqayb qaataha, waa in aad haysatid markhaati buuxinaya macluumaadka hoose.

Qor Magaca Markhaatiga

Sixiixa Markhaatiga

Xariirka uu la leeyahay Markhaatiga Bukaanka (tusaale ahaan., xaas/nin, wiil uu dhalay, qof deris ah, iwm.)

HEALTHeLINK ma ahan-urur-faa'iido raadis ah. Waxay dadka ula wadaagtaa si elektaroonig iyo ammaan ah macluumaadka kusaabsan caafimaadka dadka si loo wanaajiyo tayada adeegaha daryeelka caafimaadka. Nooca wadaagistaan waxaa lagu magacaabaa ehealth ama tiknoloojiyada macluumaadka caafimaadka (caafimaadka IT). Si aad u oggaatid inbadan oo kusaabsan ehealth ee kajira Gobolka New York, akhri warqada qoraalka, "Macluumaadka Wanaagsan Macnaheedu waxay tahay Daryeel Wanaagsan." Waxaad ka codsan kartaa Kaqayb qaate midaas loogu talogalay, ama gal boggaan internetka www.ehealth4ny.org

Faah-faahinta kusaabsan macluumaadka bukaanka kujira HEALTHeLINK iyohabka nidaamka oggolaanshaha:

1. Sida loo Isticmaali doono Macluumaadkaaga.

Macluumaadkaaga caafimaadka elektarooniga ah waxaa isticmaali doona Bixiyayaasha Kaqayb qaadanaya kuwaas oo aad adigu oggolaatay waxayna u isticmaali doonaan kaliya in ay:

- Kusiiyaan daaweyn caafimaad iyo adeego laxiriira
- Baaraan haddii aad qabtid caymis caafimaad iyo waxa ay cayminayso.
- Qiimeyn iyo horumarin kusameeyaan tayada daryeelka caafimaadka lasiiyo dhammaan bukaanada.

Macluumaadkaaga caafimaadka elektarooniga ah waxaa isticmaali doona Bixiyayaasha Kaqayb qaadanaya kuwaas oo aad adigu oggolaatay waxayn u isticmaali doonaan kaliya in ay:

- Hawlaha Wanaajinta Tayada. Kuwaan waxaa kamid ah qiimeyn iyo wanaajin lagu sameeyo tayada daryeelka caafimaadka adiga lagu siiyay iyo dhammaan xubnaha caafimaadka cayiman.
- Hawlaha Maaraynta Daryeelka. Kuwaan waxaa kamid ah in adiga laguugu caawiyo helida daryeel caafimaad munaasab ah, wanaajinta tayada adeegaha daryeelka caafimaadka adiga lagu siiyay, isku duwida bixinta adeegaha daryeelka caafimaadka badan adiga lagu siiyay, ama in laguugu caawiyo qorshaha soo socda ee daryeelka caafimaadka.
- Hawlaha Kahor-Oggolaanshaha. Kuwaan waxaa kamid ah muraajacaynta iyo qiimeynta macluumaadka caafimaadka si aad u codsatid adeegaha kahor-oggolaanshaha ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

XUSUUSNOOW: Doorashada aad kusamayso Foomkan Oggolaanshaha ma ahan mid u oggolaanaya dadka kucayiman caafimaadka si ay u helaan macluumaadkaaga loogu talogalay ujeeddo ah go'aansashada haddii lagu siinayo caymis caafimaad ama lagaa bixinayo biilalkaaga. Waxaad kusamayn kartaa doorashadaasi Foom Oggolaansho gooni ah midkaas oo ay khasabtahay in ay isticmaalaan dadka kucayiman caafimaadka.

2. Maxay yihiin Noocyada Macluumaadka Adiga kugu Saabsan Ay Ka Koobantahay. Haddii aad bixiso oggolaansho, Kaqayb qaatayaasha aad adigu oggolaatay waxay ka heli karaan DHAMMAAN macluumaadkaaga caafimaadka elektarooniga ah ee la heli karo tooska HEALTHeLINK. Midaana waxaa kamid ah macluumaadka lasameeyay kahor iyo kadib taariikhda Foomkan Oggolaanshaha. Diiwaanadaada caafimaadka waxaa kamid ah taariikhda jirooyinka ama dhaawacyo aad qabtay (sida sonkoroow ama laf jabtay), natiijooyin baaritaan (sida Raajooyin ama baaritaano dhiig), iyo liisas kusaabsan daawooyin aad qaadatay. Macluumaadkan waxaa dhici karta in uu xiriir la leeyahay xaalado caafimaad xasaasi ah, ay kujirto laakiin aanan ku ekayn:

- Mushkilado khamro ama daroogo
- Cuduro hiddo wadde ah (la dhaxlo) ama baaritaano
- HIV/AYDHIS
- Xaalado caafimaad maskaxda ah
- Xakamaynta ilmaha iyo ilmo iska soo ridid (u qorsheynta qoyska)
- Cudurada galmada la isaga qaado

3. Halka uu ka Imaanayo Macluumaadka Caafimaadka Adiga Kugu saabsan. Macluumaadka adiga kugu saabsan wuxuu ka imaanayaa meelooyin adiga laguugu siiyay daryeelka caafimaadka ama caymiska caafimaadka ("Illooyinka Macluumaadka"). Kuwaan waxaa kamid noqon kara isbitaalada, dhakhtarada, farmashiyooyinka, shaybaarada caafimaadka, caymisyada caafimaadka, barnaamijka Caawimaada caafimaadka, iyo ururo kale oo ehealth ah kuwaas oo isku dhaafsada macluumaadka caafimaadka qaab elaktaroonig ah. Liis buuxa oo kusaabsan Illooyinka Macluumaadka hadda ah waxaa laga helayaa dhinaca HEALTHeLINK. Waxaad ka heli kartaa liis la cusboonaysiiyay wakhti kasta adiga oo ka fiiriya bogga internetka HEALTHeLINK halkan ah www.wnyhealthelink.com ama adiga oo waca 716-206-0993 wicitaanka fog. 311.

4. Yaa heli kara Macluumaadka Adiga kugu Saabsan, Haddii aad Bixisid Oggolaansho. Kaliya dadkan ayaa heli kara macluumaadka adiga kugu saabsan: dhakhtarada iyo bixiyayaal caafimaad kale kuwaas oo ka adeega shaqaalaha caafimaadka ee Bixiyaha Kaqayb qaaadashada la oggolaaday midkaas oo ku lug leh daryeelkaaga caafimaadka; bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee cayminaya ama wacaya dhakhtar Bixiye Kaqayb qaadanaya oo la oggolaaday; iyo xubno shaqaale oo Kaqayb qaatayaal la oggolaaday ah kuwaas oo fulinaya hawlaha lagu fasaxay Foomkan Oggolaanshaha sida kor loogu sharxay gudaha qodobka koowaad. Liis buuxa oo kusaabsan Kaqayb qaatayaasha ayaa laga helayaa dhinaca HEALTHeLINK boggaan internetka ah www.wnyhealthelink.com ama adiga oo waca 716-206-0993 wicitaanka fog. 311.

5. Cuquubaha loogu talogalay Gelida Aan munaasabka ahayn ama In Si Khaldan Loo Isticmaalo Macluumaadkaaga. Waxaa jira cuquubado loogu talogalay gelida ama helid aan munaasabka ahayn ama isticmaalka la isticmaalo macluumaadkaaga caafimaadka elektarooniga ah. Haddii wakhti kasta oo ay noqoto aad ka shakiso in qof aanan ahayn in uu arko ama galo macluumaadka adiga kugu saabsan uu galay ama helay, wac mid kamid ah Kaqayb qaatayaasha adiga u oggolaatay in ay galaan ama helaan diiwaanadeena; ama ka booqo bogga internetka HEALTHeLINK halkan www.wnyhealthelink.com; ama kawac HEALTHeLINK lambarkan 716- 206-0993 wicitaanka fog. 311; ama kawac Waaxda Caafimaadka NYS lambarkan 877-690-2211.

6. Dib u kashifida Macluumaadka. Macluumaad caafimaad kasta oo elektaroonig ah ee adiga kugu saabsan waxaa dhici karta in dib-looga kashifo ama bandhigo dhinaca Kaqayb qaatayaasha ayada oo latusayo dadkale kaliya xadka laga oggolaaday dhinaca gobolka iyo sharciyada dowlada iyo xeerarka. Midaan sidoo kale waxaa lagu samayn karaa macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan ee kuqoran foom warqad ah. Qaar kamid ah sharciyada gobolka iyo dowlada waxay bixiyaan ilaalin khaas ah oo loogu talogalay qaar kamid ah noocyada macluumaadka caafimaadka xasaasiga ah, ay kujiraan HIV/AYDHISKA iyo daaweynta khamrada iyo daroogada. Shuruudahooda khaaska ah ayay khasabtahay in la raaco markasta oo ay dadku helaan noocyadan macluumaadka caafimaadka xasaasiga ah. HEALTHeLINK iyo dadka ama shaqaalaha ka gala ama ka hela macluumaadkan tooska HEALTHeLINK waxaa khasab ku ah in ay u hoggaansamaan shuruudahaan.

7. Muddada Dhaqan Galka ah. Foomkan Oggolaanshaha ah wuxuu ahaan doonaa mid shaqeeya illaa maalinta aad ka laabatid oggolaanshahaaga ama HEALTHeLINK joojiso in ay shaqada qabato.

8. Ka laabashada Oggolaanshahaaga. Waad ka laaban kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta adiga oo sixiixa Foomka Oggolaanshaha ee Kalaabashada kadibna u dhiibtid mid kamid ah Kaqayb qaatayaasha. Sidoo kale waxaad ka bedeli kartaa doorashooyinkaaga oggolaanshaha adiga oo sixiixa Foom Oggolaansho cusub wakhti kasta oo aad doonaysid. Waxaad ka heli kartaa foomamkan bogga internetka HEALTHeLINK www.wnyhealthelink.com ama adiga oo soo waca lambarkan 716-206-0993 wicitaanka fog. 311.

Xusuusnoow: Ururada ka geli kara ama ka heli kara macluumaadkaaga caafimaadka tooska HEALTHeLINK marka uu oggolaanshahaagu shaqeeyo waxay nuqul guurin karaan ama kudari karaan macluumaadkaaga diiwaanadooda caafimaad ee gaarka ah. Xitaa haddii aad hadhow go'aansato in aad ka laabato oggolaanshahaaga, ayagu loogama baahna in ay kasoo celiyaan ama kasaaraan diiwaanadooda khaaska ah.

9. Nuqulka Foomka. Adigu waxaad xaq u leedahay in aad heshid nuqul kusaabsan Foomkan Oggolaanshaha kadib marka aad sixiixdid.